Somaliska

Talosiinta bukaanlayda qaadato daawada profilatikada ee looga hortago thrombosis-ka (daawaynta AVK)

Soo bandhigid

Mid ka mid ah shaqooyinka uu qabto dhiigga waxay tahay awooddiisa ah inuu abuuro dhiig adag (Xinjiro adag). Marka ay xaaladahu yahiin caadi, dhiigga waxuu adkaada markii aad dhaawacantid uuna dilaacmo xidid. Si kastaba ha ahaatee, cuduro ayaa u noqon karaan sabab inay adkaadaan xididdada dhiigga dhexdooda, tusaale, sida wax ka imaanaayo xumaadda xididdada ama xididdada oo yeesho kalshum (atheroselerosis) kuwaasi oo kordhinaayo khatarta thrombosis.

Daawaynta iyo ka hortagga thrombosis, waxaa la helaa daawo ka samaysan warfarin, oo ah maaddo dhib uga dhigayso inuu dhiigga adkaado.

Daawada waxaa looga magacaabaa Marevan Norway iyo Denmark, iyo Waran Sweden.

Daawo-qaadashada

Qiyaasta loo baahan yahay in la qaato Marevan/Waran way ku kala duwan yahiin bukaanle ka bukaanle. Isku daawaynta Marevan/Waran waxay u baahan tahay in loo qiyaaso shakhsi ahaan. Marnaba ha beddelin qiyaasta naf ahaantaada. Keniiniyaasha waxaa la qaataa hal mar maalin kasto, inta badan habeenkii. Si loo hubiyo in aad qaadato daawayntaada, waxaa ku caawinaaya habeeyaha keniiniga ama inaad ku astaamaysid kalendaarkaada.

Tijaabada dhiigga

Bacdamaa ay tahay in loo qiyaaso shakhsi ahaan qaadashada Marevan/Waran, waxaa loo baahan yahay in tijaabooyinka loo sameeyo qiyaas fiican. Biloowga daawaynta, tijaabooyinka dhigga (ee lagu magacaabo PK INR) waxaa la qaadayaa si is-dabojoog ah, laakin kala hakinta waxaa lagu darayaa qiyaastii 4 toddobaad ka dib xoogaa waqti ah.

Dhinacyada keeni karaan dhibaato

Dhinacyada keeni karaan dhibaatooyinka aan la rabin waxay ku imaan karaan dhammaan daawooyinka. Dhinacyada keeni karaan dhibaato oo lee-yahiin Marevan/Waran waxay guud ahaan yahiin kuwo fudud. Jirka oo is-beddelo, shuban ama xoogaa timo ah oo daataan ayaa dhici karto. Haddii ay sidaasi dhacdo, fadlan la xiriir kiliinikadaada kuu qortay.

Khatarta dhiig-baxa

Bacdamaa Mareva/Waran uu dhimaayo awoodda adkaanta dhiigga, dhiig-baxa wuu dhici karaa. Si kastaba ha noqotee, khatarta ah in lagu dhibtoodo dhiig-furanka aad ayuu uga yar yahay faa'iidada ka imaan karto daawaynta ka hortagga thrombosis-ka. Haddii si kastaba kugu yimaado dhiig-bax aan la filayn sida san-gororka, siilka oo dhiigo, kaadida ama saxarada uu dhiig soo raaco, sababta waxay noqon kartaa in qiyaasta daawo-qaadashadaada ay aad u sarayso ama in loo baahan yahay baaris dheeri ah. Had iyo jeer la xiriir kiliinikadaada kuu qorto markii uu yimaado dhacdada dhiig-baxa aan la filayn.

Haddii uu yimaado dhiig-bax aan istaagayn, waa inaad la xiriirtaa kiliinikada kuugu dhow ee degdegga ah ee isbitaalka ama xarunta daawaynta dib u dhac la'aan.

Sidaasi oo kale waxaa wax looga qabanayaa haddii uu madaxa jug kaa gaaro ama uuslayda si loo fiiriyo inuusan jirin dhiig-bax.

Daawaynta kale

Daawooyinka la soo qoro qaarkood, daawaynta lagu qaato miiska daawaynta iyo sidaasi oo kale daawayn-quwad soo celinta dabiiciga ah waxay raad ku yeelan karaan metabolism-ka marevan/Waran-ka ee jirkaada. Raad ku yeelashada Mareva/Waran waxuu noqon karaa mid aad xoog u leh ama mid aad u daciif ah.

Daawada loo qaato xanuunka ay ku jiraan acetylsalicylic acid iyo kuwa lagu magacaabo NSAIDs (daawada loo qaato jir hurka) waxay kordhiyaan habka dhiig-baxa markii lagu qaso Marevan/Waran sidaasi darteed waa in laga fogaadaa nidaam ahaan. U istimaal keliya paracetamol xanuunka iyo durayga mar soo maraanka ah . Ka qaado qiyaas yar intii suurto gal ah una sheeg kiliinikadaada kuu soo qorto.

Cuntada dheelitiran

Cunto dheellitiran ee kala duwan oo khudaar lana qaato maalin kasto waa midda ugu fiican si loo gaaro waxtarka daawada oo ah mid deggan. Cuntada qaarkood, gaar ahaan khudaarta cagaaran oo ku ah qani Vitaminka K waxay la shaqayn karaan ku raad yeelashada Marevan/Waran. Si kastaba ha noqotee, ma aha mid muhiim ah haddii aad cuntid xoogaa khudaar ah maalin kasto. Ka fogaaw kala bedbedelka xad dhaafka ah ee cuntadaada dheellitiran. Haddii aad doonaysid inaa dhumisid culayska, inaad soonto ama qaado cuntada dhellitiran ee ah khudaar waana inaad u sheegtaa kiliinikada shaqada ku leh daawayntaada. Isla sidaas ayaa lagula dhaqmayaa haddii aad jiratid iyo markaad ka go'did cuntada oo aad si habboon u cuni karin cuntada.

Kadhka daawaynta/Medaalyada Waran

Had iyo jeer sii qaado daawadaada Marevan/Waran ee sugna inay muuqato lana heli karo. Haddii kugu dhaco shil, waxaa muhiim u ah hawlawadeenada xanaanada caafimaadka inay si degdeg ah u ogaadaan in lagugu daaweeyo Marevan/Waran.

Qaliinka iyo xanaanada ilkaha

Mar kasto aad la xiriiraysid takhaatiirtaada, kuwa ilkaha, isbitaalada ama xarumaha daawaynta waa inaad u sheegtid inaad qaadatid Marevan/Waran. Had iyo jeer la xiriir kiliinikada kuu qorto Marevan/Waran ka hor inta aadan marin qaliin.

Uurka iyo nasnuujinta

Waa inaad markasto u sheegtaa takhtarkaada haddii aad lee-dahay uur ama aad qorhaynaysid inaad yeelatid uur. Waa inaan la isticmaalin Marevan/Waran inta uur la lee-yahay. Si kastaba ha noqotee, Marevan/Waran waa la isticmaali karaa markii ay jirto naasnuujin bacdamaa daawada u gudbayn caanaha hooyada. Iyada oo sidaasi ah, haddana had iyo jeer la tasho takhtarkaada.

Galmada

Wax gaarsiimaydo galmada isku-daawaynta Marevan/Maran.

Sboortiga iyo layliga

Isku-daawaynta Marevan/Waran kaama reebayso inaad qayb ka qaadatid sboortiga iyo layliga. Si kastaba ha noqotee, waa inaad ka fogaataa isku-dhaca sare ee sboortiga.

Aalkolka

Xoogaa yar oo aalkol ah- hal koob wine-ah oo lala qaato cuntada – inta badan wax uma gaysanaayo daawaynta. In la isticmaalo tiro badan ama si aad joogto u ah waxay keeni kartaa khatarta inuu kordho dhiig-baxa.

Tubaakada

Inkasto ay tubaakada wax u gaysanayn isku-daawaynta Marevan/Waran, haddana cabiddiisa waxuu kordhinayaa khatarta thrombosis-ka.

Safarka

La xiriir takhtarkaada waqti fiican ka hor intaadan ugu bixin dibedda muddo dheer si looga hadlo la socodka daawayntaada. Xasuuso inaad sii qaadatid daawo kugu filan inta aad maqan tahay. Ogaw in Marevan/Waran in dibedda looga gado iyaga oo leh xoog iyo magac kale leh.

Nycomed AB
Box 27264
102 53 Stockholm
Tel: 08-731 28 00
Fax: 08-765 98 96
E-post: infosweden@nycomed.com
www.nycomed.se
www.waran.se